



Ku soo biir Wadahadalka

mustaqbalka Dugsiga Sare ee Jefferson!

Disember 11-keeda 6:00 p.m. ilaa 8:00 p.m.



Fadlan ku soo biir asxaabtaada iyo dariskaaga kulanka soo socda ee Qorshooyinka Masterka ee Fikirka ee Jefferson Arbacada, Disembar 11-keeda 6:00 p.m. ilaa 8:00 p.m. Jefferson High - *Goobta TBD.*

Eeg dhowr fikradood oo ah qaabka xarunta casriga ah ee Jefferson ay u ekaan doonto lana wadaag fikradahaaga kooxda mashruuca iyo xubin ka tirsan Guddiga Dugsiga ee deegaankaaga, Michelle DePass.

Fadlan kaalay oo la wadaag fikradahaaga

Asbuucyadii la soo dhaafay xubnaha Guddiga Qorshooyinka Masterka ee Fikirka ee Jefferson (CMPC) waxay ka shaqeynayeen fikradaha ah sida mustaqbalka Dugsiga Sare Jefferson u ekaan doono casriyeynta kadib. Kulankan wuxuu fursad siinayaa bulshada weyn si ay u miisaamaan fikradahaas isla markaana ay la wadaagaan dareenkooda iyo waxyaabaha ay ka welwelsan yihiin kooxda mashruuca iyo wakiilkooda guddiga dugsiga ka hor inta aan la dhammaystirin oo loo horkeenin Golaha buuxa.

Waa maxay Qorshooyinka Masterka ee Fikirka?

Qorshooyinka masterka ee fikirka ayaa go'aaminaya baahiyaha guud ee barnaamijyada dugsi walba, qaabka goobta, iyo qiyaasaha ku baxa casriyeynta taariikhiga ah iyo dhismaha cusub. Dadaalka qorshaynta hore ayaa naga caawin doonta sida ugu saxsan ee loo qiyaaso qiimaha casriyeynta ama dib u dhiska dugsigaas. Macluumaadkani wuxuu ka caawin doonaa PPS qorsheynta deymaha hagaajinta mustaqbalka.

Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa [Websaydhka Jefferson CMPC](https://www.pps.net/Page/14291).
<https://www.pps.net/Page/14291>